

IIB MA GALO  
FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 15ka Febraayo 1986 L. 1 R 2

JAMHUUR IYADDA QAYBADA QARANKA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin bishar waliba — **RUKUNKA:** Sana-dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Cansha qortitaanku F. R. halka sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Isma Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixiyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O U N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 6 ee 2 Feb. 1986, Dib u dhisidda  
Warshadda Caanaha ee Kamar.

Bog; 91

SHARCI L. 7 ee 2 Feb. 1986, Dib u habayn-  
ta Mihnadda Notayada.

» 101

SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 1986, Aansixin Shar-  
ciyada la soo saaray 1.7.85 ilaa 2.1.86.

» 103

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER - SHARCI L. 1 ee 2 Feb. 1986, Wax  
ku kordhinta Sharciga Dabar-goynta  
Qaadka.

» 104

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

Sharci lambar 7, taariikh 2 Feb. 1986: Dib u habeynta  
Mihnadda Notaayada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaantaha Golaha  
Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciiga soo socda:

Qod. 1aad

Mihnadda Notaayada waxaa lagu dhaqayaa Sharci-  
ga lambar 8 ee 15-2.1961 iyo Xeerka-tashriiciga lambar  
1 ee 2-3.1962.

Qod. 2aad

Iyagoo Sharciyada kor ku tilmaaman ay sidooda u  
taagnaanayaan, Madaxweynaha JDS, dhegeysiga soo-  
jeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta kad-  
dib, wuxuu Notaayo u magacaabi karaa, imtixaan la'-  
aan, qof xagga aqoonta gaarka ah ee mihnadda Notaa-  
yenimada, khibradda iyo waayo arganimada uu leeyah-  
ay dartood loo gartay inuu mudan yahay xilkaas in  
uu qabto.

Qod. 3aad

1. Sharciyaqaannada ka tirsan Wasaaradda Gar-  
soorka iyo Arrimaha Diinta ee dhaqangalka Sharciigan  
ka hor hayey xil Notaayo, waxaa u furaan in ay shaqada  
notaayenimada sii wataan iyagoo tan Dawladda istiqaa-  
lo ka keenaya ama ay ku laabtaan Wasaaraddooda

2. Kala doorashada labada fursadood waa in ay  
ku dhacdaa muddo lixdan maalmood gudahood ah, laga  
billaabo maalinta Sharciigani uu dhaqan galo.

Qod. 4aad

Khidmadda Notaayuhu uu ku yeelanayo hawlaha  
uu qabto waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne,  
iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka  
iyo Arrimaha Diinta

Qod. 5aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon Karin Sharcigan.

Qod. 6aad

Sharciganj wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)